IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة رسمية

Sannadka 12aad Muqdisho 3ika Luulyo 1984 L. 2R7

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadki waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

### QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER SHARCI L. 7 ee 12 Juunyo 1984, Wasaaradda Arrimaha Gudaha — Bogga 524

XEER SHARCI L. 8 ee 26 Juunyo 1984, Kordhina Muddo Fasax Qalab iyo Badeeco ka keenid Dibadda oo ku Meel gaar ah — » 526

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.—
QAYBTA SADDEXAAD

DAWLADDA H. MUQDISHO, 16-1.83, Nado Dhul Mardaadi Dheerow Iikar — » 527

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

DAWLADDA H. MUQDISHO, 16.1.83, Nado
Dhul J. Xaashi Bulhan Maxamed L.203 » 528

DAWLADDA H. MUQDISHO, 16.1.83, Nado
Dhul J.le Faarax Maxamuud Ciid L. 204 » 529

DAWLADDA H. MUQDISHO, 16.1.83, Nado
Dhul J.le Cab/hi Caamac Barre L. 205 » 530

DAWLADDA H. MUQDISHO, 16.1.83, Nado
Dhul J.le Faaduma Shariif Abukar L.206 » 531

DAWLADDA H. MUQDISHO, 16.1.83, Nado
Dhul J.le Nuurto Cabdulle Xasan L. 207 » 532

DAWLADDA H. MUQDISHO, 16.1.83, Nado
Dhul J.le Maxamed Saciid Aadan L. 208 » 533

DAWLADDA H. MUQDISHO, 29.1.83, Nado
Dhul J.le Xaaji Macalim Ibraahim L. 209 » 534

DAWLADDA H. MUQDISHO, 29.1.83, Nado
Dhul J.le Faaduma Max'ed Cilmi L. 200 » 535

DAWLADDA H. MUQDISHO, 29.1.83, Nado
Dhul J.le Inj. Khaliif Xaaji Ismaaciil L.211 » 536

DAWLADDA H. MUQDISHO, 29.1.83, Nado
Dhul J.le Cab/hi Xaaji Cumar L. 212 » 537

DAWLADDA H. MUQDISHO, 29.1.83, Nado
Dhul J.le Saciid Axmed Yuusuf L. 213 » 538

DAWLADDA H. MUQDISHO, 29.1.83, Nado
Dhul J.le Cab/man Axmed Yuusuf L. 214 » 539

DAWLADDA H. MUQDISHO, 29.1.83, Nado
Dhul J.le Cabdi Xaaji Maxamed L. 215 » 540

DAWLADDA H. MUQDISHO, 29.1.83, Nado Dhul J.le Ruqiya Ca/le Cumar L. 216 » 541

DAWLADDA H. MUQDISHO, 27.11.82, Bed. Bed. Naado Dhul Jaalle Maxamed Cusmaan Hilowle L. 217 » 542

DAWLADDA H. MUQDISHO, 27.11.82, Bed. Bed. Naado Dhul J.le Caasha Xasan Faarax L. 218 » 543

DAWLADDA H. MUQDISHO, 27.11.82, Bed. Bed. Naado Dhul Jaalle Maxamed Saalax Xuseen L. 219 » 544

DAWLADDA H. MUQDISHO, 27.11.82, Bed. Bed. Naado Dhul Jaalle Nuurto Xaaji Xasan L. 220 » 545

DAWLADDA H. MUQDISHO, 27.11.82, Bed. Bed. Naado Dhul J.le Jaamac Cabdi Cali L. 221 » 546

DAWLADDA H. MUQDISHO, 27.11.82, Bed. Bed. Naado Dhul J.le Maxamed Cali Mire L. 222 » 547

DAWLADDA H. MUQDISHO, 27.11.82, Bed. Bed. Naado Dhul Jaalle Sahra Khaliif Cabdi L. 223 » 548

DAWLADDA H. EE MUQDISHO, 4.7.84 Naado Dhul Jaalle Cabdulqaadir Maxamed Nuur L. 224 » 550

DAWLADDA H. EE MUQDISHO, 4.7.84, Naado Dhul J.le Mire Awaare Jaamac L. 225 » 551

DAWLADDA H. EE MUQDISHO, 29.7.84, Naado Dhul Jaalle Indhadeeq Cali Maxamed L. 226 » 552

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 20.6.84, Lumid Buug Keyd L. 31711 ku qoran Faaduma Aadan Cabdi L. 227 » 553

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21.5.84, Lumid Buug Keyd L. 638 ku qoran Xaawo Xasan Roo'ble L. 228 » 554

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16.7.84, Lumid Jeeg War. L. 681766 ku qoran Cali Maxamuud Sabriye L. 229 » 555

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16.7.84, Lumid Jeeg War. L. 681577 ku qoran Maxamed Aadan Yuusuf L. 230 » 556

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.7.84, Lumid Buug Keyd L. 14994 ku qoran Yuusuf Cabdi Xasan L. 231 » 557

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.7.84, Lumid Jeeg War. L. 3688 ku qoran Sheekh Maxamed Xuseen L. 232 » 558

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.7.84, Lumid Jeeg War. L. 3689 ku oqran Sheekh Maxamed Xuseen L. 233 » 559

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER, 20.6.84, Lumid Jeeg War. L. 402630 ku qoran Saleebaan Xasan Cabdilaahi L. 234 » 560

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 31.7.84, Lumid Jeeg War. L. 120299 ku qoran Muuse Shariif Nuur L. 235 » 561

SAXID QALAD

FAAFINTA RASMIGA AH L. 1 r 7 ee 19 Luulyo 1984, Bog. L. 516 oo si lama filaan ah ugu soo baxday

[illegible]

[illegible]

[illegible]

## QAYBTA LABAAD
## X E E R

Xeer Sharci Lambar 7 taariikh 12 Glu. 1984 Wasaaradda Arrimaha Gudaha.—

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 14 ee 3da Juun 1962 kuna saabsan Nidaamka dhismaha Dawladda iyo beddelaadyadii ka dambeeyay;

MARKUU TIXGELIYEY: Duruufaha is bedelay iyo baahida keentay in dib loo dhiso Wasaaradda Arrimaha Gudaha si loo xaqiijiyo maamul mideysan xagga hoggaaminta Gobollada iyo Degmooyinka oo u horseeda horumarinta dhaqaalaha iyo bulsho ee degaanada iyo sugidda nabadgelyada iyo xasilloonida guud ee gudaha;

MARKUU TIXGELIYEY: baahida degdegga ah ee dhaqangelinta Go'aankani ay leedahay;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada.
WUXUU SOO SAARAYAA Xeerka sharci ee soo socda:

### Qod. 1aad

Waxaa lagu kordhiyey qaabka dhismaha Dawladda Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

### Qod. 2aad

1. Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxay qabaneysaa hawlaha la xiriira habeynta iyo horumarinta maamulka Gobollada iyo degmooyinka Dalka, horumarinta nolosha bulshada reer Miyiga, kormeerka iyo ilaalinta hawlqabadka Dawladda Hoose iyo hay'adaha kale ee heer Gobol ama degmo, ilaalinta iyo sugidda nabadgel-

yada iyo xasiloonida guud ee Dalka gudihiisa, taaku leynta Ciidamada ka daafaca Qaranka weerarrada dibedda, maamulidda socdaalka iyo Jinsiyadda, kormeerka iyo ilaalinta xabsiyada Dalka iyo xarumaha Dhallinta Kacaanka.

2. Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxaa hoos yimaada Maamulka Gobollada iyo degmooyinka Dalka marka laga reebo Gobolka Banaadir. Waxaa kale ee hoos yimaada, marka ay gudanayaan xilalkooda sugidda nabadgelyada iyo xasiloonida guud ee gudaha iyo maamulka xabsiyada iyo xarumaha Kacaanka, Ciidanka Booliska iyo Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed.

Qod. 3aad

Waxaa la baabi'iyay Sharci iyo Xeer kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qod. 4aad

Xeerkan sharci dhaqangalkiisu wuxuu ka billaabanayaa 1da Juun 1984. Waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. waxaana loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 12 Giu. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Xeer Sharci L. 8 26 Giu. 1984 Kordhin Muddo Fasax ka keenid Dibadda oo ku meel Qalab iyo Gaar ah.—

JDS

ISAGOO ARKAY Qod. 69aad ee Dastuurka J.D.S;
ISAGOO ARKAY Xeer Sharci Lam. 4 ee 30.9.81 kuna Saabsanaa wax ku keenidda habka Franco Valuta iyo ka dambeeyey;
ISAGOO Xeer Sharci Lam. 1 ee 1.1.84 oo loo rogay sharci lam. 11 ee 15.1.84 fasax qalab ka keenid Dibadda ee ku meel gaar ah;
ISAGOO ARKAY: Xeer Sharci Lam. 3 ee 8.3.1984;
ISAGOO GAROWSADAY: inay tahay lagama maarmaan in la kordhiyo muddada ku xusan xeer Sharciga Lam. 3 ee 8.3.1984;
ISAGOO DHEGEYSTAY: Talada Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga;
ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada.—
WUXUU SOO SAARAYAA Xeer Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Muddada Fasaxa ee ku tilmaaman Xeer Sharci lam. 3 ee 8.3.1984 waxaa lagu kordhiyay muddo saddex bilood ah waxayna dhamaanaysaa 30ka Sebt. 1984ka.

Qod. 2aad

Qalabka iyo badeecadaha lagu keeni karo Dalka J.D.S. Ictimaad la'aan ee ku tilmaaman Xeer Sharci Lam. 1 ee 1.1.84 iyo Xeer Sharci lam. 3 ee 8.3.84 waxaa lagu kordhiyey kuwa soo socda:

Qalabka Beeraha nooc kasta ha ahaadee, iyo alaabta Dayactirka ee Warshadaha, Gaadiidka iyo qalabka wax soo saarka.

Qod. 3aad

Xeer Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda waxaana loo gudbinayaa Golaha Shacbiga ee Qaranka si sharci loogu rogo.—

Muqdisho, 26 Giu. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Mardaadi Dherow Iikar uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 30.1.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 24X41 kuna fadhiya 984 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D.Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 202

# DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

### NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaashi Bulxan Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 26.5.82 uu ku weydiistay ga'bal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Cabdulcasiis Qaabkiisuna yahay Poligono Irregolaare Addimihiisuna yihiin ———— kuna fadhiya 540,50. MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D.Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 16. Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 203

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Weyrax Maxamuud Ciid uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 2.1.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Kuntuwaareey Qaabkiisuna yahay Afar Gees isla eg Addimihiisuna yihiin 13,50X 13,50 kuna fadhiya 182,20 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D.Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Gen 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.

Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Jaa mac Barre uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmi ga ah ee Daladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikh du ahayd 20.4.82 uu ku weydiistay gabal dhul Dawla deed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Wardhiigley Qaabkii suna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur wax aa kaxiga: Dhul dad leeyahay
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ah ee D.Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAAXDA MAAMULKA DH EE D/H
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 205

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaaile Faaduma Shariif Abuukar uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikh du ahayd 12.12.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawla deed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisu na yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 32X20 kuna fadhiya 620 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Dhul Lam. 427 Biis
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 422 Biis
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ah ee D.Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 206

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Nuurto Cabdulle Xasan uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 27-11-82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Boondheere Qaabkiisuna yahay Afar Gees islaeg Addimihiisuna yihiin 12X12 kuna fadhiya 144 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: J/le Cabdullaahi Nuur
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Maxamed Gusri

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ah ee D-Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 207

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Saciid Aadan uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikh du ahayd 16.12.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Hawl-Wadaag Qaab kiisuna yahay Afar Gees islaeg Addimihiisuna yihiin 13,50X13.50 kuna fadhiya 182.50 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | J. Maxamuud X. Max'ed |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Waddo |
| Galbeed waxaa ka xiga: | W.Hawl-Wadaag |
| B a r i waxaa ka xiga: | Xaawo Cumar |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D.Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 208

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

---

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Macallim Ibraahim iyo Cusmaan Cumar Ibraahim uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 29.5.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho deg. Xamar Jab Jab Qaabkiisuna yahay Trapezolde Addimihiisuna yihiin (16X2) (14X1,46) ÷ 44,6 kuna fadhiya 153,80 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid yar
Koonfur waxaa ka xiga: Jid
Galbeed waxaa ka xiga: Jid
B a r i waxaa ka xiga: Waddada CSP. Martiini.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D.Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 29. Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 209

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faaduma Maxamed Cilmi uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 6.1.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Wardhiigley Qaabkiisuna yahay Afar Geesle Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul dad leeyahay |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul dad leeyahay |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul dad leeyahay |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshada dhulka oo taal waaxda dhulka Rasmiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 29 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 210

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Inj. Khaliif Xaaji Ismaaciil uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikh du ahayd 27.12.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawla deed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Yaaq Shiid Qaabkii suna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Shariif Sh. Madat.
Koonfur waxaa ka xiga: Cabdi Idle
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Aadan Makaraan

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 29 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 211

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## WAAXDA DHULKA RASMIGA

## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Xaaji Cumar uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee dawaldda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikh du ahayd 20.12.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawla deed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Hawl-Wadaag Qaab kiisuna yahay Afar Gees islaeg Addimihiisuna yihiin 13,50X13,50 kuna fadhiya 182,25 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Waddo |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dirir Axmed |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Jid yar |
| B a r i waxaa ka xiga: | Maxamuud Xaaji Cumar |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 29 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Ca'bdi Cusmaan

L. 212

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saciid Axmed Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 10·11·82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Wadajir Qaabkiisuna ya hay Afar Gees islaeg Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SID AHOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Maxamed Dahar
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Cabduraxmaan Axmed
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 29 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 213

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdiraxmaan Axmed Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose maalintii taariikhdu ahayd 10.11.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Afar Gees islaeg Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya 400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Sheekh Axmed
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Saciid Axmed

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 29 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 214

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Xaaji Maxa muud Muuse uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 1.1.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20X40 kuna fadhiya 800 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: 21ka Oktoobar
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 1097
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 1098
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 29 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 215

# DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ruqiya Cabdulle Cumar uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikh du ahayd 17.1.83 uu ku weydiistay gabal dhul dawla deed ahoo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 15X20 kuna fadhiya 300 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 592 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 589 B.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Ra smiga ee D/Hoose Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 29 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DH. EE D/H.
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 246

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistey Jaalle Maxamed Cusmaan Hilowle maalintii taariikhdu ahayd 31.7.76 looan oggolaaday oo ku yiil Muqdisho Deg. Hodon Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addimihii suna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 Mdh. Loona qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan sidaa awgeed Naada dii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa WHG.3.23 545 ee 6.7.77 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA TAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Waddo |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 249 B. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 252 B. |

Muqdisho, 27 Nov. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA D. HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 217

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay J.le Caasha Xasan Faarax maalintii taariikhdu ahayd 6-12-76 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho Deg. Ho don Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaa yeen 30X20 kuna fadhiyey 600 Mdh. Loona qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku kaal Muqdisho Deg. Kaaraan sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa WHG.3-23,69 ee 2-2-77 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.—

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA TAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 233 B. |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 289 B. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 232 B. |

Muqdisho, 27 Nov. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA D. HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 218

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Saalax Xuseen maalintii taariikhdu ahayd 2.9.75 loona oggolaaday oo ku yiilay Muqdisho Deg. Hodon Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisu na ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 Mdh.— Loona qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan sidaa awgeed Naada dii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa WHG.3.23 574 ee 20.12.75 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu be deshay sida hoos ku tilmaaman.—

Dhulkii loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA TAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 248 B. |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Waddo |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 245 B. |
| B a r i waxaa ka xiga: | Waddo |

Muqdisho, 27 Nov. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA D. HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 219

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Nuurto Xaaji Xasan maalintii taariikhdu ahayd 21.11.74 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho Deg· Ho don Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 Mdh· Looga qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Deg· Kaaraan sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa WHG·3.23.203, ee Maajo 1976 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bede shay sida hoos ku tilmaaman·

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA TAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul Lam· 279 B· |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lam· 275 B. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 278 B· |

Muqdisho, 27 Nov. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA M· DHULKA D. HOOSE
Jeom· Maxamuud Cabdi Cusmaan

L· 220

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

## BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Jaamac Cabdi Cali maalintii taariikhdu ahayd 8.10.60 loona oggolaaday oo ku yiilay Muqdisho Deg. Hodon Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 Mdh. Loona qaaday dan guud awgeed looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkiisuna ahaa WHG.3.23.86 ee 10.1.77 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.—

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud awgeed wuxuu ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA TAN:

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 445 B. |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 181 B. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 184 B. |

Muqdisho, 27 Nov. 1982

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA D. HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 221

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la cadedynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamuud Cali Mire maalintii taariikhdu ahayd 13.5.68 loona oggolaaday oo ku yiilay Muqdisho Deg. Hodon uu is bedelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 20X30 kuna fa dhiyey 600 Mdh.— Sababtoo ah dan guud awgeed.

Sidaa awgeed Naadadii hore oo lagu soo diray war qadda lambarkeedu ahaa WHG.3.23.355 Abriil 1977 ka na baxday Xafiiskan waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.—

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin karo Jaalahaas Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 Mdh. kuna yaal Deg. Kaaraan.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA TAN:

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 217 B. |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 213 B. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Waddo |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 818 B. |

Muqdisho, 17 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA D. HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 222

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Sahra Khaliif Cabdi maalintii taariikhdu ahayd 16.4.74 oo ku yiilay Muqdisho Deg. Hodon uu iska bedelay Cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 40X30 kuna fadhiyey 1200 Mdh. Sababtoo ah dan guud awgeed.

Sid aaawgeed Naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG.3.23.2521 ee 24.4.77 kana baxday Xafiiskan, waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.—

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin karo Jaalahaas Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 Mdh. kuna yaal Deg. Kaaraan.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA TAN:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 211 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 207 B.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lam. 210 B.

Muqdisho, 17 Gen. 1983

AGAASIMAHA WAAXDA M DHULKA D. HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 223

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulqaadir Maxamed Nuur Guuleed uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 16.5.84 uu kuweydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. ——— Jidka Afgooye Xamar Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X10 kuna fadhiya 300 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Dhul dad |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Dugsi |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul dad |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhulkiisii hore |

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D. Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 4 Lug. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA D. HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 224

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Mire Awaare Jaamac uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 9.4.84 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Jidka Agooye Xamar Qaab kiisu yahay Afar Gees islaeg Addimihiisuna yihiin 30X30 kuna fadhiya 900 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul dad
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad
B a r i waxaa ka xiga: Dhul dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D. Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 4 Lug. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA D. HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cusmaan

L. 225

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sha. Indhadeeq Cali Maxamed iyo Luul Maxamed Barre uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 19-2-84 uu ku wey diistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Jidka Afgooye Xamar Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 17X150 kuna fadhiya 25.500 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad
Koonfur waxaa ka xiga: Cabdulqaadir M. Nuur
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad
B a r i waxaa ka xiga: Dhul dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D. Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 29 Lug. 1984

AGAASIMAHA WAAXDA M. DHULKA EE D. HOOSE
Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 226

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

**HADDUU ARKAY:** Dacwadda kor ku qoran;

**HADDUU ARKAY:** In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 31711 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hodon kuna qoran lacag dhan Sh.So. 3.750 uu iska lahaa Faaduma Aadan Cabdi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 311 taariikhdeedu ——— ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hodon;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 31711 oo ku qoran magaca Faaduma Aadan Cabdi ayna ku jirto Sh.So. 3.750.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hodon u bedelo Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga keenin.

Muqdisho, 20.6.1984

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 227

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 638 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wardhiigley kuna qoran lacag dhan Sh.So. 1.902.00 uu iska lahaa Xaa wo Xasan Rooble sida ku cad warqadda lambar keedu yahay 202 taariikhdeedu 20.5.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta War dhiigley.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 638 oo ku qoran magaca Xaawo Xasan Rooble ayna ku jirto Sh.So. 1.902.00.—

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley u bedelo Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daaabco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 21.5.1984

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 228

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 681766 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wardhiigley kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000 uu iska lahaa Jaalle Cali Maxamuud Sabriye sida ku cad warqadda lam barkeedu 233 taariikhdeedu 16.7.84 ee Bankiga Ga nacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L. Wardhiigley;
HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J g War. Lamb. 681766 oo ku qoran Cali Maxamuud Sabriye ayna ku jirto Sh.So. 20.000.—

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley u bedelo Jeeg War. ee kor ku til maaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maa linta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga keenin.

Muqdisho, 16.7.1983

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 229

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;
HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 681577 laga soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wardhiigley kuna qoran lacag dhan Sh.So. 10.000 uu iska lahaa Maxamed Aadan Yuusuf sida ku cad warqadda lambar keedu 233 taariikhdu 16.7.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Wardhiigley;
HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 681577 oo ku qoran Maxamed Aadan Yuusuf ayna ku jirto Sh.So. 10.000.—

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley u bedelo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib mar key ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J. D. Soomaaliya haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.—

Muqdisho, 16.7.1983

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 230

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In B. K. dhumay oo lambarkiisu ahaa 14994 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 75061 uu iska lahaa Yuusuf Cabdi Xasan sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 552 taariikhdeedu 29.7.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 14995 oo ku qoran magaca Yuusuf Cabdi Xasan ayna ku jirto Sh.So. 75061.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad u bedelo Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka varayn 30 maalmood maalinta Go'aan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J. D. Soomaaliya haddii inta ka horaysa aan is hor taag laga keenin.—

Muqdisho, 30.7.84

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 231

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 3689 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qo ron lacag dhan Sh.So. 100.000 uu iska lahaa Sheekh Maxamed Xuseen sida ku cad warqadda lambarkee du 0001801 taariikhdeedu 29.7.84 ee Bankiga Ganac siga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;
HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 3689 oo ku qoran Sheekh Maxamed Xuseen ayna ku jir to Sh.So. 100.000.—

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga keenin.

Muqdisho, 29.7.84

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 232

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 3688 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000 uu iska lahaa Sheekh Maxamed Xuseen sida ku cad warqadda lambarkeedu 0001801 taariikhdeedu 29.7.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 3688 oo ku qoran magaca Sheekh Maxamed Xuseen ayna ku jirto Sh.So. 100.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u bedelo Jeega War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 29.7.1984

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 233

MAXKAMADDA GOB· TOGDHEER BURCO

BAAFIN JEEG LUMAY:-

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Caddayn Jeeg Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Burco;

HADDUU ARKAY: Qod· 69 D.L. 9·9·65 Lumid Jeeg War. ee lam· 402630 kuna qoran yahay Saleebaan Xasan Cabdullaahi kuna jirtay Sh·So· 20,000 lagana sameeyey Laanta Burco Taariikh 20.3·84·

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeegaas War· ee kor ku xusan J/le Saleebaan Xasan Cabdullaahi markii ay ka soo wa reegto muddo 20 casho laguna shaaciyo Faafinta Ras miga ah ee Dawladda·

Waxaa laga codsanayaa: In Jeegaas cusub ee la sameyndoono gacanta laga saaro Jaalle Cismaan Saa lax Cali iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan·

BURCO, 20.6.1984

GUDDOOMIYAHA MAX. GOB· TOGDHEER BURCO
Dr· Cabdiraxmaan Sheekh Maxamed

L· 234

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;
HADDU UARKAY: In J. War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 120259 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000 uu iska lahaa Jaalle Muuse Shariif Nuur sida ku cad warqadda lambarkeedu 0000962 taariikhdeedu 31.7.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Labaad;
HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 120259 oo ku qoran magaca Muuse Shariif Nuur ayna ku jirto Sh.So. 100.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad u bedelo Muuse Shariif Nuur Jeega War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D. Soomaaliya haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

**Muqdisho, 31.7.1984**

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

**L. 205**

## MAXKAMADDA GOB. W/GALBEED HARGEYSA

UJEEDDO: Cusboonaysiin Jeeg War. 334815 ee 21.6.82 Sh.So. 30.000.00;

Guddoomiyaah Maxkamadda Gob. W.Gal/d Hargeysa.
MARKUU ARKAY: Warqadda L.Y. 60381 ee 7.7.82 ee ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soo maaliyeed ee Gobolka W. Galbeed kuna saabsan in loo cusboonaysiiyo Jeega lambarkiisa iyo lacagtu ba ay ku qoran tahay u jeedada Jaalle Cusmaan Cabdi Cali ee kaLumay;

WUXUU Go'aamiyey: In la tirtiro Jeega lumay ee lam barkiisu ahaa 334815 oo laga sameeyey laanta labaad Bankiga Hargeysa taariikh 21.6.82 isla markaasna Ban kigii sameeyey Jeega uu u cusbooneysiiyo Jaalle Cus maan Cabdi Cali Cusbooneysiinta Gacantana laga saa ro isaga ama ciddii kale ee uu soo siiyo Wakaalad rasmi ah, 15 maalmood kadib oo ka bilaabata maalinta Go' aankan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J. D. Soomaaliya.

Waxaa la farayaa Maamulaha Bangiga in uu ku dhejiyo Nuqulka Go'aanka Irridda Bankiga si ay uga eegtaan ciddii Jeega lumay haysatay ama dan kaleh.

Hargeysa, 12.7.1982

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. W. Gal/d Hargeysa
(Ibraahim Faarax Maxamed)

KAALIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA
(Maxamed Jaamac Cigaal)

MAXKAMADDA DEG· GOBOLKA BERBERA

MDGB/DWL·45.84 TAARIIKH 10·7·84

OG; Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Berbera·—

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEG· BERBERA

MARKUU ARKAY: Oacwadda kor ku qoran;

MARKUU OGAADAY: Waxa ay ku saabsan tahay Ar kaynaogeysiiska Bankiga G· iyo Keydka Soomaali yeed laanta Berbera taariikhdiisu tahay 1.1·84 wu xuu ogaaday in ay tahay Shaqadiisa;

HADDUU ARKAY: Qod· 69 D·L. 9·9·65· N·2

WUXUU CADAYNAYAA

Lumidda Jeega War· Lam. yahay 595472 kuna qoran tahay lacag dhan Sh·So· 50·000 Somali ah iskana lahaa Axmed Maxamed Aadan·

WUXUU AMRAYAA

In loosameeyo Jeeg War. ee Cusub Ninka kor ku magacaaban (15) shan iyo toban maalmood ka dib mar kii Amarkan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda·—

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeega Cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Axmed Maxamed Aadan ama qof isaga ka sita Wakaalad Sharci ah iyadoo la sugayo 15 maalmood ee kor lagu soo sheegay·—

BERBERA, 10.7·1984

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEG· BERBERA
(Maxamed Axmed Warsame)

KAALIYAHA MAXKAMADDA
(Carab Maxamed Caddow)